



SU'AALAHA LA ISWEYDIYO MARWALBA EE KA SOCODA WAALIDIINTA MUSLIMKA AH EE DPS

DPS waxay go'aansatay inay bixiso jawi waxbarasho aan aheyn takoorka aan aheyn sharci iyo dhabaataynta.

Canugeyga ma loo sheegi doonaa marka ay cuntada ku jirto waxyanaha qansiirka?

Adeegyada Nafaqada iyo Cuntada dhawaan waxay soo saareen "doofaarka" sumad sheegaysa inay cuntada ku jirto waxyaaha qansiirka. Guud ahaan, DPS quraacyada iyo qadada waxaa ku jiro wax yar oo qansiir ah. Waxaad ka hadli kartaa su'aalaha ama arrimaha maamulaha jikada dugsigaaga.

DPS ma u ogashay inuu canugeyga uusan imaanin ciidaha Muslimka?

Haa. Xeerarka Xaadirista DPS JHB-R waxaa ka mid ah xaflaaha diimada sida sababta ah ee lagu maqnaan karo. Kala xiriir dugsigaaga sida ugu dhaqsiiyaha badan sidaa darteed waxay ogaan doonaan inay ciida soo dhawdahay canugaaga wuuu maqnaan doonaa.

Canugeyga ma loo ogolyahay inuu ku dukado dugsiga?

Haa. DPS ma u takoorto ardayda dhanka ah aaminsaanta diimaha, ardayda waxaa loo ogolyahay inay ku tukadan iyo ku sameeyntaan diintooda dugsiga inta ay hawlaha faragalinayn jawiga dugsiga. Waxaan qoysaska ku dhiiragelinaynaa inaad la hadashan hogaamiyaasha si loo hubiyo in baahida diimaha loo meelayay qaabka aan dhibaato aheyn.

Maxaan sameeyn karaa marka inuu canugeyga loo dhibaateeyo Muslimimadiisa?

Ardayga ama masuulkoooda waxaa lagu dhiiragelinaya inuu si degdeg ah ugu soo wargeliyo dhacdada hogaamiyaha, la taliyaha, macalinka, Sarkaalka u Hogaansanaanta Ardayga Degmada (Xafiiska Sinaanta Ardayga iyo Fursada) hadal ahaan iyo qoraal ahaan foomka AC-E2: Foomka Cabashada Xaqiraada/ Dibaateynta. Ha ogaado hogaanka dugsiga haddii aad dareensantahay inay dhacdada ku abuureyso jawi aan ammaan ku heyn canugaaga. Kala hadal canugaaga wax ku saabsan isaga ama iyada dareemaheeda, iyo taageerada sameynta canugaaga dareemaha ee cabsida guri walba ama walaca. Ardayada ayaa sidoo kale sameeyn karaa Safe2Tell [1-877-542-7233 \(Safe2Tell.org\)](tel:1-877-542-7233) ama wac Khadka caawinta Qoyska iyo Bulshada [720-423-3054](tel:720-423-3054).

Macalmiinta DPS ma helaan tababarka dareenka dhaqanka?

Haa. Dhammaan macalmiinta cusub ee DPS waxaa laga raba inay qaatan 1.5 saac tababarka wacyogelinta eexashada iyo tababarka jawaab celinta dhaqanka. Degmada waxay bixisaa dhowr barnaamij oo ikhtiyaar ah, waxaa ka mid ah jawaab celinta waxbarashada dhaqan ahaanta, taas oo ka kooban 12 saacadood oo aasaas ah iyo tababar hormarsa; labo maalin oo tababar ah oo la dhaho rabitaanka hogaamiyaasha macalinka iyo maamulayaasha; aasaaska iyo tababarka wacyogelinta hormarsan ee shaqaalaha oo dhan.

DPS ma u bixisaa luuqada Carabiga si dookh ahaan?

Hadda, Dugsiga Sare South wuxuu bixiya Carabiga I ee loogu talagalay ardayda rabta inay barato luuqada Carabiga, sidoo kale Hidaha Carabiga ardayda u leh asala ahaan luuqada Carabiga.

Waa maxay taageerada kale ee DPS ay siisso ardayda afka hooyo uu yahay Carabiga?

Dugsiyada waxaa loo qoondeyay macalinka ku hadla luuqada afka hooyo 15 walba oo ku hadasha luuqada afka hooyo ardayda fasalooda ELA. Hadda, dugsiyada leh macalmiinta ku hadala luuqada Af-ka hooyo Carabiga: Dugsiga Denver Green, Ellis, Hamilton, Holm, McMeen, Merrill, Montclair, Place Bridge, Samuels, South, Joe Shoemaker, Southmoor iyo University Park.

Sidee u siisa DPS waalidka adeegyada fasirida iyo turjumista?

Haa, adegyadan waxaa lagu siiya waalidiinta lacag la'aan. Haddii aad u baahan doontoo turjumist ama adeega fasirada, fadlan weydiso maamulaha dugsigaaga inuu soo gudbiyo codsiga ku haboon ogeysiiinta (toddobo maalmood, haddii ay surtogonal tahay) xafiiska Adeegyada Dhaqamada badan ee DPS. Xaaladda degdeg aha ama baahida aan la filaynin, dugsi walba wuxuu leeyahay khadka luuqada turjumista ee telefoonka.